

Xirfadlaha Shaqada Maalintii

Waxaad Ka Fekertaa Shaqo ah Daryeelid oo leh Mustaqbal

*Ku raaxeyso shaqo ah daryeelka
caafimaadka oo ah mid wax weyn
ka beddeleysa nolosha dadka*



Xirfadleyaasha daryeelka ee shaqeyta maalintii waxay dadka ka caawiyaan hawlo ay ka mid yihiin sida tababarka xirfadaha shaqada, baris ah arrimaha nolosha, tababarid ah fahamka bulshada, qorsheynta hawlaha, taageerista hawlaha bulshada iyo dedaal ah sida la isu xilqaamo, sameynta farshaxanka, qurxinta beerta guriga iyo waxyaabo kale oo tayo u yeelaya nolosha. Hawluhu waxay ku kala duwan yihiin nooca shaqada iyo baahida shakhsiyeed iyo dookha qofka. Xirfadleyaashu waxay caawiyaan dadka naafada ah, dadka u baahan caafimaadka dhimirka iyo dadka waayeelka ah. Shaqada noocan ah waa ay kugu fiican kartaa haddii aad jeceshahay in aad sameyso hawlo loo qabto koox yar, in aad dadka wax barto iyo inaad ka fekerto hal-abuurid ah waxqabad iyo caawin.

Xirfadleyaasha daryeelka ee qabta shaqada noocan ah waxaa la yiraahdaa Takhasuska Shaqada, Takhasuska Kobcinta, Xirfadleyaasha Taageerada Tooska, Takhasuska Adeegyada Taageerada Togan, iyo waxyaabo kale oo badan. Waxaa jira magacyo badan oo loogu yeero xirfadleyaasha.



Waxaa jirta baahi weyn oo loo qabo xirfadleyaasha shaqadan ah daryeelka. Taas macnaheedu waa inay hadda goobaha shaqada shaqaale raadinayaan. Waxaa la filayaa in ay baahida badan ee loo qabo Xirfadleyaasha Shaqada Maalintii sii badan doonto tobanka sano ee soo socda.

WAXBARASHO

Shahaadada dugsiga sare ama tan dadka waaweyn ayaa looga baahan yahay qofkii qabanaya shaqooyinkan, laakiin waxaa jira waxyaabo ka reebban. Goobaha shaqada badankooda iyagaa dadka u tababara waxyaabaha muhiimka u ah shaqada. Goobaha shaqada weydii shaqaalaha ay rabaan iyo tababarka ay u hayaan marka ay kuugu yeeraan wareysiga shaqada. Goobaha shaqada waxa ay mushaarka u badin karaan dadka leh khibrad, tacliin, iyo shahaado.

LEYSANKA SHAQADA

Ma jiraan wax leysan daryeela ah oo la isaga baahan yahay. Shaqooyinka qaarkood ayaa la iska rabi karaa leysanka darawalnimada. Goobta shaqada weydii shaqaalaha ay rabaan marka ay kuugu yeeraan wareysiga shaqada.

AQOONSIGA SHAQADA

Shaqooyinka badankooda la iskama rabo shahaado ah xirfad-aqoonsi. Goobta shaqada weydii shaqaalaha ay rabaan marka ay kuugu yeeraan wareysiga shaqada.

BAARITAANKA SHAQAALAHA

Shaqaalaha daryeelka oo dhan waa in ay ku gudbaan baaritaanka dambiyada. Haddii aad walaac ka qabto, kala hadal goobta shaqada marka ay ku wareysanayaan.

AQOONTA LUUQADAHA

Dadka hadda barta afka Ingiriiska ee ku hadla luuqado kale oo aan ahayn afka Ingiriiska waa ay qaban karaan shaqadan. Weydii goobta shaqada shuruudaha la iska rabo shaqada. In xoogaa lagu hadli karo afka Ingiriiska waa wax muhiim ah sababtoo ah dadka loo shaqeynayo waxay ku hadli karaan afka Ingiriiska oo keliya.

Xirfadlaha Shaqada Maalintii

SHAQOQOYIN KALE

Waxaa jira fursado shaqo oo badan oo la xiriira daryeelka dadka. Shaqooyinkaas waxaa looga sii gudbi karaa kuwa kale oo ah caafimaadka, adeegyada dadweynaha, waxbarista dadka iyo kuwa kale. Mararka qaarkood goobaha shaqada ayaa dadka ay qoranayaan siiya tababar ama waxbasho si ay aqoon ugu yeeshaan shaqooyin badan. Fursadahaas weydii marka aad ku jirto wareysiga shaqada.

MUSHAARKA

Mushaarka waa ay uu ku kala duwan yahay goobaha iyo xilka shaqada, oo waa \$13.25 ilaa \$22 saacaddii.

HAWLAHA SHAQADA MAALINTII

Hawsha shaqooyinka ayaa kala duwan oo waxa ay ku xiran tahay waa baahida qofka, oo ah sida:

- In la sameeyo daryeel la isku hubo, oo ay ka muuqato naxariis iyo masuuiyad.
- In la qiimeeyo horumarka qofka iyada oo qofka la barayo waxa noloshiisa u fiican.
- In qofka la caawinayo loo raaco meelaha uu soo booqanayo ee bulshada gudaheeda, aadis ah shaqo, wareysiyada macluumaadka, waxyaabaha kale ee ah madadaalada, dukaameysiga, iwm.
- In qofka lagu caawiyo aadista meel ilaa meel kale, in uu ka soo kaco kursiga curyaanka oo loo wareejiyo kursi ama jirka oo loo beddelo, in lagu caawiyo gelista musqusha iyo hawlo kale.
- In la diyaariyo oo la qoro horumarka qofku gaaray iyo adeegyada loo qabtay, iyo in laga soo warbixiyo isbeddellada xaaladda qofka.

- In la qabto hawlo la xiriira daryeelka caafimaadka, sida in qofka la siiyo daawooyin.
- In laga qeybgalo kulanka kooxda daryeelka ee qofka, iyadoo la qiimeynayo baahiyada iyo sida loo caawinayo ee ah qorsheynta taageerada.
- In qofka wehel loo noqdo ama lagu caawiyo sida loola qabsado isbeddellada nololaha ee dhaca.
- In qofka la baro waxyaabo cusub iyo in la qoro xogta horumarka qofka.
- In qofka lagu caawiyo qorsheyn ah cunto caafimaad leh oo lagu soo barto galaasyo.
- In qofka lagu caawiyo sida dadka loola hadlo, teeb in dadka wax loogu qoro, in la adeegsado kambuyuutar ama shaashad teknoolaji oo ah caawin, in macluumaad laga helo qof kale, iwm.

SIDA LAGU RAADSADO XIRFADLAHA SHAQADA MAALINTII

Kala hadal shaqaalaha xafiiska CareerForce ee goobta kuugu dhow:

- Booqo [CareerForceMN.com/locations](https://www.careerforcemn.com/locations)
- Soo garaac 651-259-7500

Toos ula xiriir goobaha shaqada:

- Shaqooyin ka baaro liiska [CareerForceMN.com/job-search](https://www.careerforcemn.com/job-search)



CareerForceMN.com/CaringCareer

651-259-7500 – Turjubaan ayaa loo diyaarinayaa qofkii naga soo socda